

Kaalmo masruuf iyo wixii dheeri ah ee macaawinada dhaqaalaha

Daryeelka qofka iyo qoyska (Individ- och familjeomsorgen)

Xuquuqda macaawinada (Rätten till bistånd)

Qofka deggan degmadda **Ljusdal** oo aan is masruufi karin, shaqo ahaan ama si kale wuxuu xaq u leeyahay kaalmo masruuf. Caawimaada bulshadu waa gargaar nololeed oo bulshada dhexdeeda ka jira, waana inaad marka hore raadsataa dhamaan noocyada kale ee dakhli oo aad xaq u leedahay. Tusaale ahaan dakhliga aad ka heli karto hay,adda caymiska, qasnada shaqo la,aanta ama lacagta waxbarashada oo ay ku jirto qeybta deynta ah (inklusive studielån) oo ka timaada hay,adda taageerada waxbarashada (CSN).

Qofku waa inuu helaa caawimaad la hubo oo ku salaysan xaalad nololeed oo macquul ah.

Qofka waxaa waajib ku ah inuu intii suurtagal ah uu asagu is masruufo

Qofka codsanaya kaalmo masruuf ama nuuc kale oo caawimaad ah waa inuu noqdaa mid ku xidhan suuqa shaqada oo uu diyaar u yahay inuu qaato shaqada ama hawlgelinta kale ee loo diro. Waajibkani sidoo kale wuxuu khuseeyaa tallaabooyinka siyaasadda suuqa shaqada sida waxbarashada suuqa shaqada ama tallaabooyinka baxnaaninta shaqada. Waxaa waajib kugu ah inaad dalbato shaqo wakhti fiican kahor dhammaadka waxbarashada, tababarka, ama shaqada. Waa inaad iska soo diiwangelisaa Xafiiska Shaqada maalinta ugu horreysa ee shaqo, aadna isla samaysaan qorshe hawleed. Haddii aadan awoodi karin ka qaybgalka suuqa shaqada, waa inaad keenta warqad caafimaad oo caddeynaysa awood la,aantaada dhanka shaqada.

Codsiga (Ansökan)

Codsiga kaalmada masruufka waxaa loo fiirinayaa (falanqaynayaa) hab bile ah. Bilwalba waxaa la doonayaa inaad keento codsi cusub oo aad soo raaciso (kusoo lifaaqdo) dhammaan dakhligaaga iyo kharashkaaga. Waxaa la xisaabinayaa kharashka iyo dakhliga aad haysatay intii lagu jiray bisha gudaheeda. Waxaa kale la qeymaynayaa waxaad qabatay si aad u hesho kaalmo masruuf. Markaad codsaneyso kaalmo dhaqaale, waa inaad cadeyso macluumaadkaaga ku saabsan dhaqaalahaaga iyo dhammaan noocyada dakhliga si loo xisaabiyo baahiyahaaga. Tani waxay saamaynaysaa dhammaan dadka guriga ku nool.

Codsiga cusub waxaa la baarayaa xaalada dhaqaale ee saddexdii bilood ee ugu dambeeyey, dhigaalkaaga dheeraadka ah waxaa loo wareejinayaa bisha xigta. Waa masuuliyadaada inaad kala qorshayso oo aad muhiimad kala siiso dhaqaalahaaga.

Xitaa hantidaada kale waad ku soo qoraysaa codsiga sida guri, gaadhi, raasamaal, canshuur soo noqotay iwm. Haddaad leedahay hanti kale oo la iibin karo oo daaboli karta baahidaada caadi ahaan xaq uma lihid kaalmo masruuf.

Kaalmo masruuf

Kaalmada masruufku waxay ka kooban tahay laba qeybood, **qiyaasta qaran iyo kharashka macquulka ee ka dheeriga ah qiyaasta qaran.**

Qiyaasta qaran waxay sawir ka bixinaysaa heerka isticmaal macquul ah ee daboolaya kharashka qofka iyo kharashka guud ee guriga:

cunto	dhar/kabo	caafimaadka/nadaafada
fasax/madadaalo	wargeys	Telefoon
shatiga TV-ga	alaabta la isticmaalo	

kharashka aan ku jirin qiyaasta qaranka oo macquulka ah waa la soo codsanayaa, adigoo tusaya qaan-sheegadka (faktura):

- kharashka deeggaanka (Boendekostnad)
- korontada guriga (Hushållsel)
- caymiska guriga (grundförsäkring)
- safarka shaqada (Arbetsresor)
- kharasha xubinimada shaqaalaha (Fackföreningsavgift)
- kharashka xannaanada carruurta (Barnomsorgsavgift)

Gargaarka dhaqaale ee dheeriga ah (Övrigt ekonomiskt stöd)

Gargaarka dhaqaale ee dheeriga waxaad usoo codsan kartaa si ka baxsan qiyaasta qaran. Caawinaada ay degmadu go, aanka ka gaarayso waa sidan soo socota:

- Qalabka guriga (Hemutrustning)
- Daryeelka Ilkaha (Tandvård)
- Kharasha duugta (Begravningskostnader)
- caafimaadka – iyo daryeelkan (Hälso- och sjukvård)
- Kharashka guuritaanka (Flyttkostnader)
- Muraayadaha aragga (Glasögon)

Haddii aadan ku qancin go,aanka kaalmada masruufka waxaad xaq uleedahay racfaan.

Waxaa naggi waajib ah haddaan tuhuno inuu jiro dambi kaalmo (qiyaano) inaan booliiska wargelino.

Kaalmadii aad si khaldan ku hesho waxaa waajib kugu ah inaad soo celiso.

Shaqaaluhu waxay leeyihiin sir qarin. Warbixinada aad nasiiso waxaan u maaraynaynaa si waafaqsan xeerka xogta shaqsiga iyo xeerka xifdinta sirta. Haddaad doonayso inaad codsato mucaawino dhaqaale ama aad qabto su,aalo ku saabsan kaalmada masruufka soo dhawoow oo nala soo xidhiidh. Soo booqo qaybteena adeegga macaamiisha ee dabaqa 3 ee guriga degmadda ama wac rugta gudbinta telefoonka 0651-180 00, codsana inaad la hadasho gacanyare qaybta kaalmada masruufka. Halkaas ayaad ka helayaa warbixin ku saabsan waqtiga telefoonka.